# Warqada ogaysiiska bukaanka ee sharciga ku saabsan caawinta iyo tallaabooyinka ka hortagga cudurrada dhimirka (PsychKG NRW)

Maalin wanaagsan (Magaca hore/ Magaca Qoyska):

________________________________________________,

Waxaan rabnaa inaan kaa caawino inaad si dhakhso ah u bogsato.

Warqadan ogaysiiska waxaan jeclaan lahayn inaan kugu wargelinno xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ugu muhiimsan. Qoraalka aan la soo koobin ee sharciga ayaa laga eegi karaa saldhigga.

## Sababta Xareynta

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Waxaa lagu geeyay cisbitaalka, sababtoo ah waad jiran tahay, dhaqankaaga dartiisa waxaad khatar u tahay naftaada iyo dadka kale ee ku hareersan.

Sharciga ogol tan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Caawinta iyo Ilaalinta Jirrada Maskaxda. Soo gaabinta waa "PsychKG NRW".

## Go´aanka maxkammadeed (§ 14 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Garsooraha ayaa go'aaminaya inaad isbitaalka kusii jirayso iyo in kale.

Garsooraha ayaa imaanaya maanta ama berri inuu kaala hadlo xanuunkaaga. Waxaad u sheegi kartaa garsooraha wax kasta. Waxaad xaq u leedahay qareen.

Haddii garsooruhu iman waayo, waa lagu fasaxi doonaa. Haddi aanu takhtarka kaltanka leh bilaabin nidaam cusub oo PsychKG ah.

Waxaad dacwad qoraal ah oo ka dhan ah go'aanka garsooraha u gudbin kartaa maxkamadda muddo laba toddobaad gudahood ah. Shaqaalaha xarunta ayaa kaa taageeri doona cabashada.

## Dukumenti kaydinta – Xaquuqda eegida (§ 16 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Shaqaaluhu waxay qoraan waxa dhaca inta daawaynta lagu jiro. Haddii aad dareento fiicnaan, tillaabooyinka qasabka ah ayaa mar kale lagaala hadli doonaa.

Waa laguu oggol yahay inaad akhrido wax kasta oo shaqaaluhu kaa qoreen.

Tan waxaa lagu magacaabaa xaqa eegitaanka.

## Joogitaanka banaanka (§ 16 Abs. 1 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Waxaa laguu oggol yahay inaad bannaanka u baxdo, beerta dhexdeeda ama barxadda ugu yaraan hal saac maalin kasta.

## Baaritaanka caafimaadka ee Cusbitalka (§ 17 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Dhakhtar ayaa ku baari doona sida ugu dhakhsaha badan.

Dhaqtar ayaa hubin doona inaad weli khatar gelinayso naftaada ama dadka kale.

## Ogaysiinta qof lagu kalsoon yahay (§ 17 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Haddii aad rabto, waxaan u sheegi doonaa qof aad ku kalsoon tahay (saaxiibo, qoys, daryeele) inaad ku jirto isbitaalka.

Haddii aad rabto, waxaan ku wargelin karnaa qareen.

Haddii aad leedahay mas'uul sharci ah, isaga/iyada si toos ah ayaa loogu wargelin doonaa.

Dadkani waxay ka qaybqaadan karaan wada hadalkaaga garsoorka.

## Daaweeynta (§ 18 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Jirradaada annaga ayaa kaa daweyn karna. Waxa lagu dawayn doona oo kaliya haddii aad ogolaato. Taas waxaa loo yaqaan ogolaanshaha. Tani waxay sidoo kale khuseysaa daawada. Waxaa jira waxyaabo ka reeban sharcigan.

Daaweynta waa in si faahfaahsan lagaala hadlo.

1. Waxaa ka reeban:
Dhakhtarku waxa uu kugula dhaqmi karaa adiga oo aan raalli ka ahayn haddii jiradaadu ay keento khatar weyn.

Khatar weyn bay sababaysaa, haddii habdhaqankaaga la xidhiidha xanuunka uu khatar u keeno noloshaada ama khataro caafimaad oo aad u daran adiga iyo dadka kaleba.

Sida caadiga ah, daawaynta khasabka ah waxa la samayn karaa oo keliya haddii garsooruhu bixiyo fasax / rukhsad / ogolaansho.

2. Waxaa ka reeban:
Aad bay dhif u tahay dhakhtarku inuu sameeyo daawaynta khasabka ah isagoon waydiin garsooraha. Taasi waa marka uu dhakhtarku u maleeyo inaysan sugi karin in garsooruhu yimaado - haddii kale wax xun ayaa dhici kara.

Labadan ka reeban waxa loo yaqaan daawaynta khasabka ah.

## Talaabooyin ammaan oo gaar ah (§ 20 PsychKG NRW)

### Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Haddii aad khatar geliso naftaada ama kuwa kale gaar ahaan, takhtarku wuxuu dalban karaa tallaabooyinka soo socda:

1.) Banaanka laguuma ogola
ama
2.) Qol kaligaa ayaa lagu geynayaa albaabkana waa lagu xirayaa
ama
3.) Shaqaaluhu way ku hayn karaan,
ama
4.) shaqaaluhu waxay kugu xidhi karaan sariirta.

Talaabooyinkan waxaa la ogol yahay kaliya, haddii wax kale oo caawinaya aanay jirin. Waa in isla markiiba la soo afjaraa marka aanay khatari jirin.

Haddii aad xiran tahay in ka badan 30 daqiiqo, garsooruhu waa inuu oggolaadaa.

Marka aad dareento fiicnaan, waxaad waydiisan kartaa garsooraha inuu hubiyo inaad si xaq ah laguu xiray.

## Joojinta Xareynta (§ 15 PsychKG und § 25 PsychKG)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Maalin walba waa la hubiyaa in hoygu wali lagama maarmaan yahay iyo in kale.

Haddii aad dareento fiicnaan, waxaad awoodaa:

- fasax laguu iclaamiyo
- lagaa sii daayo / eryo
- daawaynta lagugu sii wado.

## Alaabaha gaarka loo leeyahay, Booqasho, Isgaarsiinta iyo Warbaahinta, Sigaarka (§ 22 PsychKG)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Waa inaad u dhiibtaa alaabta khatarta ah shaqaalaha kalkaalinta. Waxaad dib u heli doontaa alaabta marka lagu sii daayo.

Waxaad isticmaali kartaa telefoonka gacanta iyo laptop. Waxaad diri kartaa waraaqo. Waxa kale oo aad heli kartaa waraaqo. Haddii aad rabto, sidoo kale waa lagu soo booqan karaa.

Fadlan ka fiirso dadka kale ee ku jira hooyga.

Waxaa laguu ogol yahay oo kaliya inaad ku cabto goobta sigaarka. Si cad ayaa loo calaamadeeyay.

Laguuma ogola inaad sawiro ama duubid cod kaqaadato dadka kale ee ku sugan Rugta Caafimaadka LVR iyaddoo ogolaansho laga helin.

## Kharashka Duaweynta

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Haddii aanad lahayn caymis caafimaad, fadlan nala soo socodsii. Shaqaalaha u qaabilsan adeegga bulshada ee rugta caafimaadka LVR ayaa taas kaa caawin doona.

## Heshiiska Daaweynta Behandlungsvereinbarung, Patientenverfügung (§ 2 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Waxaa suurtogal ah inaan rugteena markale kugu daaweyno. Waxaan sidoo kale tixgelin doonaa dardaaranka bukaanka.

Waxaad heshiis qoraal ah la geli kartaa dhakhtarka si aan markaas u ogaano sida ugu wanaagsan ee aan kuula dhaqmayno. Tan waxa loo yaqaan heshiis daawaynta. Heshiiskan ayaa hadhow khuseeya dhammaan dhinacyada ay khusayso.

## Cabasho (§ 24 PsychKG NRW)

Macluumaad gaaban (si fudud loo fahmaayo)

Haddii aadan ku qanacsanayn, waad caban kartaa.

Waxaa jira fursado kala duwan. boodh guud ayaa lagu dhejiyay xarunta. Ama waxaad weydiin kartaa shaqaalaha.

Waxaa jira siyaabo kale oo loo cawdo (cinwaanada eeg lifaaqa):

**Waxaan rajaynaynaa inaad dhakhso u bogsato!**
**Rugtaada LVR**

## Lifaaqa:

### Fursadaha Cabashooyinka

Had iyo jeer waxaad haysataa fursad aad kaga cabato, tusaale ahaan: ku saabsan daawaynta ama wax kale.

**1. Shaqaalaha goobta jooga ee xarunta:**

La hadal shaqaalaha adeegga kalkaalinta, qaybta kalkaalinta ama maamulaha waaxda iyo, haddii aad rabto, Takhaatiirta / Dhakhaatiirta. ama:

**2. Bukaan u doode dadka loogu yeeraa dhexdhexaadiyayaasha meesha jooga Rugta caafimaadka**

Si loo taageero bukaanka, dhexdhexaadiye madax-banaan ayaa loo magacaabay LVR-Klinik kaas oo wakhti kuu qaadan doona oo aad kala hadli karto welwelkaaga goobta. Waqtiyada adeega iyo nambarka teleefoonka eeddo-hayaha waxa laga heli karaa sabuuradda ogeysiiska ee qaybta deegaankaaga.

ama:

**3. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa agaasinka caafimaadka ee Rugta LVR ee goobta, kaas oo ku farxi doona inuu kula hadlo ballan:**
Shaqaalaha qaybta ayaa ku farxi doona inay kaa caawiyaan diyaarinta ballan.

Xogta xiriirka ee agaasinka caafimaadka ee rugta caafimaadka LVR:

ama:

**4. Meelo ka baxsan rugta caafimaadka LVR, waxaad cabashadaada u gudbin kartaa: Maamulka cabashada dhexe ee Golaha Gobolka Rheineland.**

Landschaftsverband Rheinland/ ZBM
50663 Köln
Tel.: 0221/ 809 2255, E-Mail: beschwerden@lvr.de

ama:
**5. Ugu dambeyntii, waxaad sidoo kale u jeesan kartaa xarumaha la-talinta ee madax-bannaan ee dadka khibradda dhimirka leh ee ku nool gobollada kala duwan, tusaale:**

### Gobolka Köln
Beschwerderat Psychosoziale Arbeitsgemeinschaft (PSAG) Köln
c/o Rat und Tat e.V. Kempener Str. 135
50733 Köln, Tel: 0163/ 383 1686, E-Mail: beschwerderat@web.de

### Gobolka Düsseldorf
Unabhängige Beschwerdestelle Psychosoziale Arbeitsgemeinschaft (PSAK) Düsseldorf
Kölner Str. 180, 40227 Düsseldorf
Tel: 0211/ 899 2622 Anrufbeantworter,
E-Mail: psag_beschwerdestelle@duesseldorf.de

### Gobolka Duisburg-Essen
Unabhängige Beschwerdestelle der Psychosozialen Arbeitsgemeinschaft (PSAG) Duisburg
c/o Gesundheitsamt Herr Marcel Hellmich,
Ruhrorter Straße 195, 47119 Duisburg
Tel: 0203/ 283 2709, E-Mail: beschwerdestelledu@gmx.de

### Gobolka Krefeld
Psychosoziale Beschwerdestelle Krefeld
Westwall 134, 47798 Krefeld
Tel: 02151/ 389 261 Anrufbeantworter,
E-Mail: beschwerdestelle@psag-krefeld.de

### Gobolka Viersen
Beschwerdestelle des Gemeindepsychiatrischen Verbundes Kreis Viersen
Kontakt: BIS e.V., Klosterstr 5, 41379 Brüggen
Tel: 02163/ 5622, E-Mail: info@bis-brueggen.de

ama:

**6. Haddii aad qabto fikradda ah in welwelkaaga aan si waafi ah loo tixgalin, waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad kala xiriirto maamulka degmada ee kormeerka cabashadaada si waafaqsan qodobka § 30 ee sharciga bukaanka nafsaaniga PsychKG:**

- Dowladda Degmada Köln, Kormeerka Isbitaalka, PO Box, 50606 Köln
- Dowladda Degmada Düsseldorf, Kormeerka Isbitaalka, PO Box 300865, 40408 Dusseldorf

**Daabac macluumaad**
Daabacaadda 2-aad, 2022
Ka mas'uul ah waxa ku jira:
Waaxda LVR 8/ 84.20 ee la xiriirta
81.30 (waaxda sharciga).
Qofka lala xiriirinayo: Uwe Blücher
84.20.

**Waxaa ka hawlgalay / wax ku darsaday:**
Si saddex-arag ah loo habeeyey:
shaqaalaha taageerada kasbashada
ee xarumaha LVR, wakiilada qoyska,
khabiir ku takhasusay cilmi nafsiga
iyo teraabiyada cilminafsiga, madaxa
waaxda adeegyada kalkaalinta,
sarkaalka xidhiidhka dadweynaha,
maaraynta mashruuca SEIB,
sarkaalka isdhexgalka, ZBM,
agaasinada kalkaalinta iyo agaasinada
caafimaadka ee LVR rugaha
caafimaadka ee lagama maarmaanka u
ah ku-dhaqanka buug-yarahan.

**Bandhiga qoraalka:** oo si sahal
ah loo fahmi karo (dadka u dhow)
luqadda ku salaysan xeerarka luqadda
si fudud loo fahmi karo (Verein
Netzwerk Leichte Sprache e.V.) iyo
amar wareegta ah. 2 oo ka socda
Waaxda LVR 1.

**Noocyada luqadda:**
Waxaa jira 32 tarjumaad oo buug-
yaraha xeerka bukaanka nafsaasinga
PsychKG ah oo la heli karo.

Qaybinta dibadeed ee xaashida
ogaysiis xuquuqda daabacaadda waa
suurtagal:
© LVR-Klinikverbund iyo Ururka
Caawinta Waxbarashada Daawaynta